

Xeer – Maamul 15 Oktoobar 1959, lamba. 140 diiw.

Dhisidda Guddiga Farsamada ee diarinta sharciyada xagga dekedaha.

WASAARADDA LACAGTA

WASIIRKA

Markuu arkay sharciga 29 Agoosto 1969, lamba. 14, kaas oo Xukuumadda Soomaaliya wakaalad loo siiyey soo-saaridda xeerar cusub ku saabsan Nidaamka Dekedaha;

Markuu Aqoonsaday baahida loo qabo cayimaadda Guddiga Farsamada, ee ku xusan qodobka 2aad, ee sharciga la soo soo sheegay, ee xagga diyaarinta qoraalka sharciga dekedaha, iyo weliba kuwa la xiriira oo wadartooda ay isku noqonayaan Nidaamka Dekedaha, ee Dhulka;

Markuu arkay Amargooyada lamba. 8, ee 15 Oktoobar 1954;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

Guddiga Farsamada, ee diyaarinta sharciyada, xagga dekedaha, waxa uu ka kooban yahay:

- Dr. Tomasso Iezzi, Garsoore Maxkamadda Sare, guddoomiyaha Maxkamadda Caddaaladda, ee Soomaaliya, Guddoomiye;
- Hawlwadeen wakiil ka ah Wasiirka Wershadaha iyo Ganacsiga;
- Hawlwadeen wakiil ka ah Wasiirka Lacagya;
- Dr. Renato Angeloni, Garsoore Maxkamadda Caddaaladda, ee Soomaaliya;
- Madaxa Waaxda Canshuuraha;
- Dr. Giovanni Caruso, Khabiir ka tirsan Wasaaradda Lacagta;
- Madaxa Adeegyada dekedaha;
- Dr. Igino Pelosi, Khabiir ka tirsan Waaxda Adeegyada Dekedaha
- Xis. Mario Corá, wakiil ka ah Rugta Ganacsiga, Wershadaha iyo Beeraha;

Waxaa Guddiga xoghayn u noqonaya Umberto Pintus oo ka shaqeeyaa Wasaaradda Lacagta.

Qod. 2

Xubnaha uu ka kooban yahay Guddiga waxaa la siinaya lacag ramsi ah (jetoone) oo joogitaan oo dhan Sh. So. 20 fadhi kasta.

Muqdisho, 15 Oktoobar 1969.

Wasiirka

Cusmaan Axmed Roble

Waa arkay waana Diiwaangeliyey –

Diiw. lamba. 19. Xaashi lamba. 25.

Muqdisho, 19 Noofember 1959.

Hanti dhownraha: **Spadaro**